

Degmooyin dheeri ah oo Minnesota ah ayaa loo oggolaaday Kaalmada FEMA

Release Date: Sitembar 13, 2024

ST. PAUL – Degmooyinka **Martin and Murray** ayaa hadda loo oggolaaday kaalmada Shakhsiyadeed ee FEMA kadib duufaanadii ba'naa iyo fatahaadii Juun 16 - Luulyo 4.

Mulkiilayaasha guryaha iyo kiraystayaasha degmooyinka **Martin iyo Murray** waxaa suurtagala h inay hadda ka codsadaan kaalmada musiibooyinka FEMA. Markii hore, [19 degmo](#) ayaa loo oggolaaday FEMA Kaalmada Shaqsigah.

Si aad u codsato FEMA, waxaad ka geli kartaa barta onlaynka ee [DisasterAssistance.gov](https://www.fema.gov/disaster), ka isticmaal [Abka FEMA](#) taleefankaaga ama wac 800-621-3362. Haddii aad isticmaasho adeegga gudbinta sida adeegga gudbinta fiidiyowga, adeegga taleefanka qoraalka ah ama kuwa kale, sii FEMA lambarkaaga adeeggaas markaad dalbato.

Xarumaha Kasoo kabashada masiibooyinka sidoo kale waxay u furan yihiin inay ka caawiyaan badbaadayaasha inay codsadaan kaalmada musiibooyinka fadaraalka, soo geliyaan dukumeentiyada, in su'aalhooda looga jawaabo shaqsi ahaan, helaan noocyada kale ee caawimada ee laga yaabo inay helaan oo ay bartaan siyaabo ay hantidooda uga dhigaan kuwo u adkaysta masiibooyinka.

Xarumaha Kasoo kabsashada Musiibooyinka waxay ku yaallaan:

Degmada Cottonwood: Dhismaha Xafiiska Degmada Cottonwood 41385 U.S. Highway 71, Windom, MN 56101

Degmada Le Sueur: Waterville City Hall 200 3rd Street South, Waterville, MN 56096

St. Louis County: St.Louis County Puplic Training Room 7823 Highway 135, Virginia, MN 55792



FEMA

Page 1 of 2

Waseca County: Waseca Public Safety Center 303 S. State St., Waseca, MN
56093

Saacadaha Shaqada: Isniin - Jimcaha 9-ka subaxnimo – 6:30 fiidnimo, Sabtida.
9-ka subaxnimo – 4-ta galabnimo. **Axadaha way xiranyihiin**

Xitaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hawlgalka soo kabashada
musiibada ee Minnesota booqo www.fema.gov/disaster/4797.



FEMA

Page 2 of 2